Barbaarinta Caruurta



Cabdifataax M. Ducaale

BARBAARINTA CARUURTA

Qore

Cabdifataax M. ducaale (cajab)

2018

Copyright © 2018 by Cabdifataax Maxamuud Ducaale " Cajab "

All rights

Reserved No part of this book may be reproduced in any form or by any means, eletronic or mechanical, including photocopying, recording, or by any information storage and retrieval system,without written permission from the Copyright owner.

“Buuggan waxbalagama baddali karo, lama badin karo, lamana min guurin karo, iyadoon ogalaanshiyo laga haysan qoraaga buugga”.

All questions and comments should be directed to:
Author: Cabdiftaax M. Ducaale (Cajab)

cajab100@gmail.com.
Facebook : Trainer Abdifatah Cajab
Mobile : 0907061362

Second Edition Pages: 90 . Language: Somali

TUSMADA BUUGGA

Tusmada buugga 4

Hordhac 6

Yaa loogu talagalay buuggan? 7

Cutubka 1aad Cutu1aad 8

Qaabka looga baahanyahay inuu waalidku ula hadlo caruurtiisa 8

Cutubkan Wuxuu ka koobnaan doonaa qodobadan :- 8

QiimaHa uu leeyahay wada hadalku.....9

Qaabka 1aad oo caruurta loola hadlo 10

in lagu bilaabo Wada hadalka dareen xanbaarsan kalgacayl. 10

Qaabka 2aad caruurta loola hadlo 13

Inaad u dhagaysato ilmahaaga si qiimayn ku jirto 13

Qaabka 3aad loola hadlo caruurta. 15

Adeegso sheekooyin iyo tusaalayaal markaa wax u sheekayso ilmahaaga . 15

Qaabka 4aad caruurta loola hadlo. 19

“Ugu deeq ilmahaaga amaanta hana ku yarayn”.....19

Qaabka 5aad caruurta loola hadlo 21

Ilmahagaaga Dhegta u raarici markuu rabo inuu baahidiisa kuu sheegto !!! Arrintaas haddaad samayso waalidow mirahaa ka helayso waxaa ka mid ah : 21

Qaabka 6aad caruurta loola hadlo. 23

Haddii uu ilmahaagu kuula yimaado fikrado khaldan ama aad layaabto ula hadal si wax ku ool ah oo dhimrina ay ku dheehan tahay 23

Qaabka 7aad caruurta loola hadlo. 25

Waa inaad ugaarsataa meelaha uu ku fiican yahay ilmahaaga isla markaasna aad xoogasaartaa oo kobcisaa. 25

Qaabka 8aad caruurta loola hadlo.....27

Haddii aad xanaaqdo u cabir xanaaqaaga si wax ku ool ah. 27

Qaabka 9aad loola hadlo caruurta.....29

Ka digtoonaw falaaraha kaa soo burqan kara ee dhaawcaaya damiirka ilmaha intaad lahadlayso 29

Cutubka 2aad 30

Canaan inta badan natiija fiican kama dhalato.....31

Wanaaji malaha aad ilmahaaga ka filanayso. 32

Xulo oo naqeyso kelmadba kelmaday ka fiican tahay. 32

Markaa saxayso ilmahaaga ku dadaal in aad cadaalad samaysid . 33

Haka tagin dhimrinta iyo turida, markaa saxayso khaladka ilmuhu galay. 33

Ha noqon lama canaantaa caanihii daadiyay. 35

Ka soo qaad naftaada qofka khaladka ku dhacay 35

Cutubka 3aad 37

Qaabkee loola dhaqmaa ilmuhu markuu baaluqo?37

Asbaababaha keena inuu ilmuhu hallaabo oo akhlaaq xumo ku dhaco : 39

Sidee loola dhaqmaa ilmaha madaxa adag ? 40

CUTUBKA 4AAD 42

Ciqaabta ilmaha laciqaabo.....42

Maxaa ilmahaaga u ciqaabtaa ? :.....42

Dhibaatooyinka ka dhashay dilka.....43

Majiraan ciqaaabo aan dil ahayn oo ilmaha lagu ciqaabi karo ? 45

Cutubka 6aad 47

Sidee uga dhigi kartaa ilmahaaga mid jecel Nabiga (NNKH) ? 47

Sidea ayaad ilmahaaga u jeclaysiin kartaa wadankiisa hooyo ? 48

HORDHAC

Eebbe ayay u sugnaatay mahad naq oo dhan, salli iyo salaan Nabi Maxamad kor kiisa ha ahaato.

Intaas kadib:

Waxaa sharaf ii ah in aan maanta hordhac labaad u samaynaayo buugga (**Barbaarinta Caruurta),** iyadoo qormadii iyo soo saaridii hore si dhakhaso ah ku dhamaatay, bulsha weynta soomaaliyeedna ay u riyaaqeen, inta barbaarinta caruurta danaysaana ay garwaaq sadeen inuu fongor(duleel) loo baahnaa buuxiyay.

Haddaba marlabaad waxaan leeyahay hooyooyin iyo aabayaal iga gudooma buugaa jeclaydeen isagoo ay muunad iyo shacni ka muuqdo. Waxaanna Alle ka rajayn inuu buugan noqdo mid hage u noqda waalidiinta doonaaya inay barbaariyaan ubad ku tilmaaman baarinimo, karti iyo aqoon.

YAA LOOGU TALAGALAY BUUGGAN?

1. Marabtaa inay kuu noqdaan caruurtaadu kuwa kuu duceeya oo sababtooda Rabbi jannada kugu geeyo ?.
2. Marabtaa in xiligaa Rabbi hortaagan tahay uusan ilmahaagu xujo kugu noqon ?.
3. Marabtaa inaad ka mid noqoto waalidka caruurtooda u barbaariya siduu Nabiga (NNKH) uu sheegay ?.
4. Marabtaa inay caruurtaadu noqdaan kuwa ku tilmaaman dhiiranaan, geesinimo, kalsooni, deeqsinimo, baarrinimo indheer- garadnimo iyo gobanimo oo dhan ?
5. Marabtaa inay ilmahaagu hiigsadaan asxaabtii Nabiga (NNKH) ?.
6. Marabtaa inay caruurtaadu noqdaan kuwa jecel diintooda iyo dalkoodaba, isla markaasna noqda kuwa naftooda, dadkooda iyo dalkoodaba anfaca ?.
7. Marabtaa inaad barbaariso ubad leh han sare, isla markaana xanbaarsan mas'uuliyada fidinta diinta islaamka iyo wax u qabadkeeda ?.
8. Marabtaa in uu noqdo ilmahaagu mid ka qeyb qaata hormarka wadankaakiisa hooyo ?.

Su'aalahaas iyo kuwa kaleba jawaabtooda waxaad ka heli kartaa buuggan ee bal akhri oo dhuux.

Sideed uga faa'iidaysan kartaa buuggan ?

Waa inaad samayso arrimahan soo socda :-

1. Marka hore niyadda gasho inaad ka faa'iidaysato buuggan.
2. Waa inaad niyadda gashataa inaad ka mid tahay dadka loogu talagalay buuggan .
3. Isku day inaad dhowr jeer akhriso buugga si aad u fahanto talooyinka ku qoran .
4. isku day inaad dhaqan geliso intii awoodada ah talooyinka ku xusan buugga. .

CUTUBKA 1AAD

QAABKA LOOGA BAAHANYAHAY INUU WAALIDKU ULA HADLO CARUURTIISA

1) Muhiimadda uu leeyahay wada hadal dhexmara waalidka iyo caruurta .

2) Qaabka aad caruurtaada ula hadli lahayd, isla markaasna aad u dhaxal siin lahayd ubadkaaga habkan ku dhisan wada hadalka waalidka iyo ilmihiisa.

Fiiro gaar ah:

Aabayaal iyo Hooyooyin waxaa ogaataan markii la waayo wada hadal u dhexeeya waalidka iyo caruurta in xaalku noqonaayo sidan aad uga jeedaan sawirkan.







Waxaan u malaynayaa inuusan u baahnayn sawirkan sharax badan oo aan ka bixino, maxaa yeelay isagaa nooga filan inuu ina dareensiiyo baahida aan u qabno in wada hadal ka jiro guriga, haddii wada hadal la waayana xaalku sidan uu noqonaayo, waa si aan qurux badneyn !!! .

QIIMAHA UU LEEYAHAY WADA HADALKU

1) Wada hadalku wuxuu keenaa in la saxo fahamka khaldan ee caruurtu qaadan karaan, isla markaana aad qalbigooda ku sugto anshaxa iyo akhlaaqda wanaagsan .
2) Wada hadalku wuxuu keena yaraynta is qabqabsiga iyo buuqa guriga ka jira iyo waliba in lasoo afjaro dareenka ku dhisan cadaawadda ee guriga ka jira marka Wada hadalka la waayo .



3) Inay gaaraan waalidka iyo caruurtu Isfahan keenaaya inoloshii ay u socoto si wanaagsan.
4) Wada hadalku wuxuu keenaa xiriir ku dhisan kalgacayl kaa soo dhexmara waalidkii iyo caruurtiisa.
5) Wada hadalku wuxuu sahlaa in la xaliyo mushkilad kasta oo timaada. (**Aan wada hadalno waa aan heshiino**).



Biya dhaca cutubka.

- ✓ Waxaad ogaataan wadahadalku inuu yahay hubka ugu xooga badan ee aad haysataan, ee aad ku sixi kartaan khaladka caruurta .
- ✓ Waxaa ogataan wadahadalku wuxuu dhidibada u aasaa kalgacaylka iyo isku duubnaanta waalidka iyo caruurta.
- ✓ wadahadalku wuxuu barayaa caruurta kalsooni , geesinimo , aftahanimo iwm .
- ✓ Saas darteed waxaynu leenahay **(' ilmahaaga hadal ku qanci ee feer iyo faralaab haku qancin ').**

Qodobada Cutubka oo kooban.

Aabayaal iyo hooyooyin waxaan rabaa in aan idin soo bandhigo, aragti ku saabsan qaabka loola hadlo caruurta, si aad u gaartaan barbaarrinta aad doonaysaan inay idinka dhaxlaan caruurtiinu .

Haatanna waa kuwan qodobadii oo kooban.

1) Ku biloow hadalkaaga aad lahadlayso caruurtaada dareen xanbaarsan kal gacayl, sida adigoo ku dhaha waan ku jeclahay ama hab inaad siiso ama inaad dhunkato, inaad u qososho, rayrayn inaad dareensiiso iwm .
2) Si wanaagsan u dhagayso ilmahaaga markuu wax kuu sheegaayo, hadalkiisa qadarrin sii, sida aad u weyneyso marka aad la hadlayso qof aad hadalkiisa daneyneyso.
3) Inta badan adeegso markaa ilmahaaga wax ka dhaadhicinaysid sheekooyon iyo tusaalayaal wax ku ool ah oo cabiraaya waxaad rabto inaad ilmaha u sheegto.
4) Amaanta hakala bakhaylin ilmahaaga markasta uu wanaag sameeyo.
5) Dhegta u raarici ilmahaaga markuu baahidiisa kuu sheeganaayo, adigoo shardi uga dhigaya inu wanaaga ku dadaalo.
6) Markaa la hadlayso ilmahaaga ula hadal si wax ku ool ah oo dhimrin iyo naxariis ku jirto.
7) Ugaarso meelaha uu ku fiican yahay ilmahaagu iskuna day inaad kobciso ama aad ku dhiiri geliso waxa uu ku fiican yahay.
8) Adeegso oo ku dar waanadada kaftan bashaahnimo ku jirto, si aad u yarayso argagaxa iyo baqdinta uu ilmuhu dareemayo ama ku dhici karta.
9) Haddii aad xanaaqdo ku cabir xanaaqaaga qaab wax ku ool ah.
10) Waxaad ka digtoonaataa falaaraha biibaaya ee dhaawacaaya ilmahaaga,yayna kula fududaanin dhaawacyada ay falaarahaasi geysan karaan.

Intaas waxay ahaayeen qodobadii oo kooban haatana iyagoo fidsan .

QAABKA 1AAD OO CARUURTA LOOLA HADLO

IN LAGU BILAABO WADA HADALKA DAREEN XANBAARSAN KALGACAYL.

Qodobkan wuxuu ku dhisan yahay arrimahan soo socda :-

1) **Waxaa muhiim ah : -** inaad ogaato in kalgacaylka iyo dhimrintu ay kaalin weyn ka qaataan koritaanka ilmaha.
2) **Waxaa aad u qurux badan : -** inaad ku bilawdo hadalkaaga kelmado naxariis iyo kalgacayl ka buuxo.
3) **Waxaa aad u fiican: -** inaad tusto ilmahaaga bashaashnimo iyo rayrayn markaa la kulmayso.

4) **Waxaa aad u haboon: -** Inaad samayso intuu Wada hadalku socdo falal tusinaaya jacayl sida gacanta ama garabka qabato, inaad habsiiso, inaad dhamanka ka dhunkato, inaad madaxa u salaaxdo iwm .
5) Waxaa ogaataa kelmadaha iyo tilmaama tusinaya nacaybka iyo karaahiyada in ay ku keenayaa ilmaha inuu dhinto shakhsiyadiisa iyo dadnimadiisa.

Bal aad u dhuux tusaalahan soo socda :-

عن معاذ بن جبل أن رسول صلى عليه وسلم أخذ بيده، وقال: ((يا معاذ، والله إني لأحبك، والله إني لأحبك))، فقال: ((أُوصيك يا معاذ، لا تَدَعنَّ في دُبر كل صلاة تقول: اللهم أعني على ذكرك، وشكرك، وحسن عبادتك))؛ رواه أبو داود(1522) وصححه الألباني في صحيح أبي داود(1522).

((Saxaabiga la yiraahdo Mucaad binu jabal ayaa wuxu yiri Nabiga salalaahu calayhi wasalam ayaa maalin gacanta i qabtay, wuxuuna igu yiri: *Mucaadoow Ilaah ayaan ku dhaartee waan ku jeclahay !! waxaan kuu dardaar mayaa inaadan ka tegin salaad kasta gadaasheeda inaad dhahdo ducadan* (Ilaahaw igu garab gal xusitaankaaga, shukrigaaga iyo cibaadadaada wanaagsan)) .

Haddaan fiirino xadiiskan waxaan aragnaa inuu Nabiga salla laabu calyhi wasalam uu adeegsaday dareen xanbaarsan kalgacayl intussan Mucaad u dardaarmin ducada , dareenkaas oo ka kooban

(1) Gacanta ayuu qabtay.

(2) Magiciisa ayuu ugu yeeray.

(3) Wuu u dhaartay inuu jecel yahay) .

Waxaa is weydiin leh intaas ma adeegsan karnaa uu Nabiga adeegsaday, intaynaan caruurteena waanin si ay u noqoto waanadeena mid wax ku ool ah ? Rabbi hayna waafajiyo in aan adeegsano **.**

Aabbe iyo hooyo, bal sheekadaan ila dhuuxa oo tilmaamaysa wanaaga badan ee ka dhalanaya markaynu ilmaheena jacayl ku barbaarrino oo ku korino.

Diinta islaamka intaysan soo dagin carabtu waxay ahayd mid qabiil qabiil u dagaalanta, caruuraha iyo dumarka kala qafaasha, dagaal ka mid ah dagaaladii dhexmaray qabiilooyinka carabta ayaa waxaa lagu soo qabsaday wiil aad iyo aad u qurux badan oo la yiraahdo **Zeyd Binu Xaarisah,** suuq ka mid ah suuqyada magaalada Maka ayaa loo iib keenay, waxaa soo iibsaday nin la yiraahdo **Xakiim binu Xisaam**, kadib Xakiim wuxuu wiilkii u hadiyeeyay eedadiis **Khadiija Binu Khuweylid** oo ahayd xaaskii Nabiga S.C.W, kadib Khadiija waxay u hadiyeysay Nabiga S . C. W.

Seyd binu Xaaris wuxuu ku koray guriga Nabiga, isagoo ka helay naxariis, jacayl, dhaqan wanaagsan, muda kadib waxaa magaalada Maka yimi laba nin oo Zeyd qaraabadiisa ah iyagoo baadi goobaaya ama raadinaaya wiilkooda

Zeyd, waxaa loo sheegay in wiilkoodii ku nool yahay guriga Nabiga S . C . W, labadii nin waxay u yimaadeen Nabiga isagoo fadhiya masaajidka, markaas ayay waxay ku dhaheen “ wiilkii ina Cabdimudaliboow, wiilkii nabadoonka reer Makoow, waxaan kuugu nimi wiilkan gurigaaga jooga inaad nagu soo wareejiso, markaas ayuu Nabigu (S . C . W) wuxu yiri wiilkee ? waxay ku dhaheen Zeyd binu Xaarsisah, markaas ayuu wuxuu ku yiri Nabigu : arrintaas wax ka fiican maydiin sheegaa ? waxay dhaheen haa, wuxuu yiri : waan u yeerayaa goortaasna waan kala dooran siinayaa inuu idin raaco iyo inuu aniga ila joogo ! hadduu idin doorto hadde waa wiilkiinii ee ka xaysta, hadduu laakiin aniga idoorto maahi mid qof doortay ku badalanaya lacag iyo madax furasho.

Kadib Zeyd ayaa loo yeeray markaas ayaa Nabigu ku yiri : raggaan magaranaysaa ? wuxuu yiri : haa waa qaraabaday, markaas ayuu ku yiri : waa ogtahay wanaaga iyo naxariista aan kugu tarbiyeeyay ee maanta kala dooro in aad ila joogto iyo inaad qaraabadaada raacdo ! .

Akhriste, yaa u malaynaysaa inuu doortay ? ma qaraabadiis mise Nabiga ? zeyd wuxuu doortay Nabiga wuxuuna yiri : waligay qof kale kaa dooran maayo ! .

Haddii aynu dhuuxno sheekadaan waxaa inoo kasoo baxaysa qiimaha ay leedahay in ilmaha lagu koriyo kalgacayl iyo naxariis.

Haddii zeyd uu ku kori lahaa guri aan laga jeclayn, qalafsanaan iyo naxariisdaro uu kala kulmi lahaa, madooran lahaa oo maka dooran lahaa ehelkiis ? .

QAABKA 2AAD CARUURTA LOOLA HADLO

INAAD U DHAGAYSATO ILMAHAAGA SI QIIMAYN KU JIRTO .

Arrintaas waxaa ka faa'iidaysaa :-

1) Inaad fahanto dareenka ilmahaaga iyo waxa uu kuu sheegaayo heerka ay ka joogaan.
2) Waxaad kobcinaysaa oo baraysaa ilmahaaga ixtiraamka iyo in qofka sheekaynaaya la dhagaysto.
3) Waxaad ku camal fashay dardaarankii uu L13uqmaan uu siiyay wiilkiisa, markuu barayay akhlaaqda wanaagsan sida ku soo aroortay suuratul luqmaan aayada 18.

Haddii aad iska dhegatirto sheekada ilmahaaga oo aadan dhegta u raaricin waxaa imaanaaya arrimahan soo socda :

1) Inuu ilmihii niyad jabo .
2) Inuu mar danbe dantiisa kuu sheegan.
3) Inuu kaa bartay in aan qiima loo samayn qofka sheekaynaaya oo aan sifiican loo dhagaysan.
4) Inuu raadsado qof kale oo uu dantiisa u sheegto, islamarkaana uu ka helo wuxuu kaa waayay adi .

Bal sifiican u dhuux xadiiskan soo socda :-

(كان صلى الله عليه وسلم إذا لقي أحدا من أصحابه فتناول أذنه ناوله إياها ثم لم ينزعها حتى يكون الرجل هو الذي ينزعها عنه) (حسن) انظر حديث رقم : 4780 في صحيح الجامع .

"Nabigu (NNKH)wuxuu ahaa haddii qof asxaabtiisa ka mid ah uu la kulmo, islamarkaana uu rabo saxaabigu inuu Nabiga (NNKH)dhegta wax ugu sheego, Nabigu dhegtsiisa lama soo noqon jirin ilaa uu qofku dhamaysto wuxuu u sheegaayo" !! .

<u>Usluubka uu Nabiga (NNKH) adeegsaday waxaa ka dhashay :</u>

(1) Inay jeclaadeen asxaabtii (2) Inay ka heleen Nabiga (NNKH) kalsooni ay ugu sheekan karaan baahidooda (3) Inay u arkeen Nabiga (NNKH) inuu yahay mid dareemaaya baahidooda .

Fiiro gaar ah:

Hooyo iyo aabe isku daya in aad samaysaan saas oo kale, si aad u kasbataan caruurtiina, allaah waxaan ka baryaayaa inuu nawaafajiyo.

<u>Haddii aynu tusaale kale soo qaadano</u>

Oday ka mid ah odayaashii reer qureysh oo la yiraahdo Cutbah binu Rabiicah ayaa Nabiga (S . C . W) u yimi isagoo raba inuu ku qanciyo Nabiga (S . C . W) inuu ka tago diinta iyo fidinta dacwada islaamka, odaygii oo

hadlaya wuxuu yiri : war adeeroow, waa ogtahay meeshaa naga joogtaan adiga iyo qoyskaagu, waxaadna la timi arrin weyn oo aad kukala geysay tolkaa, oo aad ku quursatay aqoon yahankii tolkaa, oo aad ilaah yadoodii aad ku cayday, marka talo ayaan kuugu imid ee i dhagayso, markaas ayaa Nabigu (S . C . W) ku yiri : ii sheeg Abuu waliidoow waan ku dhagaysan.

Odaygii wuxuu yiri : war adeeroow arrintaan aad la timid haddii aad xoolo ku doonayso diyaar waxaan u nahay in aan ku xoolayno oo kaa dhigno midka noogu xoola badan, haddii aad ku doonayso inaad boqor noogu noqoto waxaan kaa dhigaynaa boqorkeena, haddii jinni kugu dhacay oo aad yara khafiiftay waxaan kuugu yeeraynaa dhakhtarka ugu qaalisan oo waanu ku dawaynaynaa ee arrintan aad waddo jooji.

Markii odaygii dhamaystay hadalkiisii ayuu Nabigu (S . C . W) ku yiri : ma dhamaysatay Abuu waliidoow ? markaas ayuu yiri : haa waan dhamaystay, kadib wuxuu yiri : haddaba ani i dhagayso ! Nabigu wuxuu bilaabay inuu ku dul akhriyo Suuratul-fusilat, odaygiina wuxuu bilaabay inuu dhuuxo qur'aanka lagu akhrinaayo, ilaa uu Nabigu (S . C . W) soo gaaray aayada sujuuda kadibna uu sujuuday, kuna yiri : Abuu waliidoow soo ma'aadan maqlin ? hadde adiga ayay kuu taalaa go'aanka aad qaadanayso.

Akhriste, haddii aynu fiirino sheekadaan waxaa inoo ka soo baxaaya arrimahan soo socda :

1. Cutbah binu rabiicah wuxuu ragiisii u tagay isagoo is badalay ilaa ay dhaheen saaxiibadiis " Abuu waliid wajigii uu inoo ka tagay maahane waji kale ayuu inoo ku yimi ".
2. Cutbah markuu u yimi saaxiibadiis waxay ka codsadeen inuu uga waramo wuxuu kala kulmay Nabiga (S . C . W), Cutbah oo ka war bixinaaya kulankii isaga iyo Nabiga dhexmaray wuxuu yiri : waxaan ka maqlay Muxamad hadal aanan waligay maqlin, Ilaahy ayaan ku dhaartee gabay maahan, sixir maahan, oo hadal faalalow maahan, walle hadalkaan maqlay war weyn ayaa ka imaan doona, ee tolkaygiiyoow Muxamad faraha ka qaada oo iska daaya, haddii carabta kale inakaga filnaato oo iyadu la dagaalanto waa saynu rabnay, haddii uu carabta ka adkaado oo boqor u noqdo, hadde boqortooyadiisu waa boqortooyadiina, sharaftiisuna waa sharaftiina.
3. Taladaas markuu u jeediyay tolkiisa waxya ku dhaheen, Abuu waliidow ninka Muxamad ah wuu ku sixray, markaas ayuu wuxuu ugu jawaabay " aniga waa taas taladaydii ee saad rabtaan yeela".

Fiiro gaar ah :

Akhriste, u fiirso sida uu Nabigu (S . C . W) uu dhuuxaayay hadalka ninka gaal ah, oo diinta islaamka la dagaalamaya, ereyo aan haboonayn Nabiga ku oranaya, Nabiga kula gorgortamaya inuu diinta islaamka faafinteeda joojiyo, intaas oo dhan iyada oo ay jirto ayuu dhagaysanaayay dhuuxaayay hadalkiisa, ee ma awoodi karnaa inaynu ilmahaneena u dhagaysano saas oo kale iyagoo ah caruurteenii aynu jeclayn ?.

QAABKA 3AAD LOOLA HADLO CARUURTA.

ADEEGSO SHEEKOOYIN IYO TUSAALAYAAL MARKAA WAX U SHEEKAYSO ILMAHAAGA .

Arrintaasna waxaad ka faa'iidaysaa :-

1) Inay cadaato oo waadix noqoto fikradaa ilmaha aad u sheekayso.
2) Inay aqbalaan caruurtu fikradaada .
3) Waxaad fulisay amarkii ilaahay, sababtoo ah Ilaahay ayaa Nabigiisa amray inuu umadiisa qisooyinka uga sheekeeyo, sida ku soo aroortay suuratu acraaf dhamaadka aayada 176 .
4) Waxaad ku dayatay Nabigeenii (NNKH) sababtoo ah isagaa adeegsan jirey sheekooyinka iyo tusaalayaasha markuu rabo inuu ka dhaadhiciyo asxaabta wuxuu rabo .

Asluubka ku dhisan amarka sida in aad ku dhahdo caruurta (saas samaye, sidaasna ahasamaynin , maxaa si daas u samaysay, saayeel, waryaa kakac tuko salaada maxaa ku jiifiyay mayd miyad tahay iwm), waa waano ka dharla naxariis iyo turid labadaba, sidaa darted inta badan qaabka noocaas ahi raad badan ilmaha barbaarrintooda kuma yeelato.

Isku day inaad si dhab ah u dhuuxdo tusaalahan :-

أَرَأَيْتُمْ لَوْ أَنَّ نَهَرًا بِبَابِ أَحَدِكُمْ يَغْتَسِلُ فِيهِ كُلَّ يَوْمٍ خَمْسًا مَا تَقُولوا ذَلِكَ يُبْقِي مِنْ دَرَنِهِ ؟ قَالُوا :لا يُبْقِي مِنْ دَرَنِهِ شَيْئًا قَالَ : فَذَلِكَ مِثْلُ الصَّلَوَاتِ الْخَمْسِ يَمْحُو اللهُ بِهِ الْخَطَايَا" (رواه البخاري في مواقيت الصلاة رقم 505).

(Nabiga (NNKH) ayaa maalin wuxuu ku yiri asxaabtiisa " ka warama haddii qofkiin gurigiisa hurtisa uu ugu yaal wabi isla markaasna uu maalintii shan jeer uu ku qubaysto jirkiisa wax wasakh ah maku haraysaa" ??? . Asxaabtii waxay dheheen may rasuulkii ilahayow !! wuxuu yiri Nabigu (NNKH) sidaa waxaa la mid ah salaadaha shanta ah, Ilaahay ayaa dunuubta ku dhaafa) .

Aabayaal iyo hooyooyin saan aragno Nabiga wuxuu rabaa inuu asxaabta (rc) ka dhaadhiciyo faham siiyana qiimaha salaadaha shanta ah, sidaa darteed ayuu wuxuu tusaale ugu soo qaatay waxay fahmaayaan, wuxuu is barbar dhigay wasakhda iyo danbiga, waxaa kaloo uu isku shabahay wabiga iyo salaadaha, sida biyuhu wasakhda u suuliyaan ayay salaaduhuna dunuubta u suulisaa.

Tusaalahan kalena bal fiira gaar ah ku fiiriya :-

"بينَمَارَجُلٌ يَمْشِي بِطَرِيقٍ وَجَدَ غُصْنَ شَوْكٍ عَلَى الطَّرِيقِ فَأَخَذَهُ فَشَكَرَ اللهُ لَهُ فَغَفَرَ لَهُ ". (أخرجه البخاري في المظالم والغصب رقم 2340 ورواه مسلم في الإمارة رقم 1914].

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Nabiga salla laahu calayhi wasalam, wuxuu ku yiri asxaabtiisii " Nin ayaa soo maray wado, ninkii ayaa wadadii ku arkay laan geed kasoo go'day oo qodax leh oo wadada taala, ninkii laantii qodoxda badnayn ayuu

wadadkii ka qaaday si aysan dadka maraaya u dhibin , Ilaahay ayaa uga mahad celiyay ninkii ficilkaas uu sameeyay waana u danbi dhaafay janaduuna keeyay.

Haddii aan yara milicsano xadiiskan waxaan dareemaynaa inuu (NNKH) sheegay qiima ay leedahay arrimahan soo socda : -

1) Nadaafada wadooyinka lamarayo.
2) Inuu qofku markasta oo ka shaqeeyo danta guud, sida in qashinka, qodaxda iyo wax kasta oo dadka wadada maraya dhibayo laga ilaaliyo wadooyinka, haddii lagu arkana laga qaado.
3) In Rabbi jecel yahay qofkii sidaas sameeya, danbigiisana uu dhaafaayo, janadana uu kaynaayo .

Maadaama uu Nabigu (NNKH) uu rabo inuu ina soo gaarsiiyo fariintaas

muhiimka ah, wuxuu adeegsaday sheeko tilmaamaysa arrintaas oo dhan .

Akhriste, bal tusaalahan kalena aad u dhuux uu Nabigu (NNKH) inaku fahansiinaayo sida Ilaaheen inoo ku farxaayo markaynu u toobad keeno .

«للهُ أَشَدُّ فَرَحاً بِتَوبَةِ عَبْدِهِ حِينَ يتوبُ إِلَيْهِ مِنْ أَحَدِكُمْ كَانَ عَلَى رَاحِلَتِهِ بأَرضٍ فَلاةٍ، فَانْفَلَتَتْ مِنْهُ وَعَلَيْهَا طَعَامُهُ وَشَرَابهُ فأَيِسَ مِنْهَا، فَأَتى شَجَرَةً فاضطَجَعَ في ظِلِّهَا وقد أَيِسَ مِنْ رَاحلَتِهِ، فَبَينَما هُوَ كَذَلِكَ إِذْ هُوَ بِها قائِمَةً عِندَهُ، فَأَخَذَ بِخِطامِهَا، ثُمَّ قَالَ مِنْ شِدَّةِ الفَرَحِ: اللَّهُمَّ أَنْتَ عَبدِي وأنا رَبُّكَ! أَخْطَأَ مِنْ شِدَّةِ الفَرَحِ) رواه مُسْلمٍ:

(Ilaahay farxaduu ku farxaayo adoonkiisu markuu u toobad keeno, waxay ka daran tahay qof fuushanaa gaadiid o ku safray meel lama dagaan ah, markaas ayaa waxaa ka cararay gaadiidkii uu fushanaa ee ay u saarnayd sahaydiisu, markaas ayuu ka quustay wuxuuna seexday geed harkiis, markaas isagoo xaladaas ku sugan ayuu indhaha kala qaaday iyadoo dultaagan, markaas ayuu qabtay hogaankeedii, markaas ayuu yiri farax dartiis : Ilaahayoow addoonkaygii ayaad tahay anna Rabbigaa ayaan ahay, farax dartiis ayuu la gafay.

Haddii aynu si qoto dheer u dhuuxno xadiiskan waxaa inoo ka soo baxaya in Nabigu (NNKH) ummadiisa usoo gudbiyay tusaale aad u sareeya oo uu ku cabbiraayo farxada uu Alle ku farxaayo marka adoonkiisu u toobad keeno, maadaama aysan aadanuhu qiyaasi Karrin farxada Rabbi wuxuu Nabigu (NNKH) tusaale ugu soo qaatay wax ay fahmayaan oo garaadkoodu gaari karo kaa soo ah qof aadana ah intuu farxo farxada ugu weyn inay farxada Rabbi ka weyn tahay ama ka badan tahay.

Akhriste, waxaad tusaalahan uga jeedaa qof ku socdaalaayay meel lama dagaan ah (bah gooyo ah), gaadiidkii sahaydu u saarnaayd uu ka baxsaday , hadduu ka daba ordona magaaraayo, hadduu qeyliyo cid maqlaysaa ma jirto, hadduu socdo oo lugeeyo meel uu gaaraayo ma jirto, halkaas markay xaaladiisu marayso ayuu geed hoostii tegay oo iska jiifsaday isagoo naftiisa ku leh halkaan ayaan iska jiifayaa inta geeridu iigu imaanayso, iyadoo xaalku halkaa maraayo ayuu indhaha kala qaaday markaas ayuu arkay hashiisii oo dul taagan oo Alle usoo celiyay, hal mar ayuu hogaankeedii ku booday isagoo faxad darteed aan ogayn wuxuu ku hadlaayo ayuu yiri “ Ilaahayoow adoonkaygii ayaa tahay anna rabbigaa ayaan ahay”. Farxad darteed ayuu gefkaas ku hadlay.

Haddaba farxada ninkaasi farxay, waxaa ka farax badan mida Alle ku farxaayo adoonkiisa u toobadkeeno, haddaba akhriste, qaabkan iyo tusaalahan uu Nabigu ina ku fahansiinaayo farxada Rabbi iyo hadduu ina dhihilahaa Alle waa idinku farxayaa haddii aad u toobad keentaan ee Alle u toobad keena waxaa aragtaa in qaabka tusaalaha ka fiican yahay qaabka kale, sidaas darteed aabbayaal iyo hooyooyin adeeg sada tusaalayaal iyo sheekooyin aad ku fahan siinaysaan caruurtiina fariintaa rabtaan inaad gaarsiisaan.

Akhriste, sunnada Rasuulka (NNKH) waxaynu ka helaynaa sheekooyin badan oo uu Nabigu (NNKH) ummadiisa ku beeraayo quluubtooda akhlaaqda wanaagsan sida runta, deeqsinimada, mahad naqida nimcooyinka kale ku siiyay.

Markaynu rabno inayu ilmaheena uga sheekaynu Baarrinimo, dhawrsanaan, xalaal miirasho iyo xaqa aadanaha oo layska ilaaliyo, waxaynu soo qaadan karnaa Sheekadii sadexdii nin ee godka u hoyday dhaguxuna markaas afka ka daboolay meel ay ka baxaana waayay, kadibna ay Alle ku baryeen camaladooda midka ugu wanaagsan, kii koowaad wuxuu Rabbi ku baryay baarrinimo, midkii labaadna wuxuu ku baryay dhawrsanaan uu sino ka dhawrsaday, midkii sadexaadna uu ku baryay iska ilaalinta xuquuqda aadanaha, haddii marka waalidku ilmihiisa barayo baarrinimo, dhawr sanaan iyo xalaal miirasho sheekadaan oo kale ayuu uga sheekayn karaa.

Sidoo kale markaynu rabno inaynu caruurteena ku beerno quluubtooda in Rabbi qofka ka toobad aqbalo markuu tawbadkeeno danbiguu galay nooca uu rabo ha noqdee, waxaynu uga sheekayn karnaa Sheekadii ninkii boqolka qof dilay ee malaa'iktu kuwada dooday midkoodeebaa qaadanaaya, ma ahlu janna mise ahlu naar, waalidka raba inuu ilmihiisa baro inay tawbadu furan tahay, danbi kastana laga toobad keeni karo, sheekadaan oo kale ayuu uga sheekayn karaa.

Waalidku markuu rabo inuu ilmihiisa baro in Alle nimcaduu ku siiyay kuu siyaadinaayo haddii aad u mahad naqdo, isla markaasna uu kaa xayuubinaayo nimcadaas haddii aadan mahad naq la imaan, wuxuu tusaale usoo qaadan karaa Sheekadii sadexdii nin ee la imtixaanay oo mid ahaa indhoole, midna ahaa cudurka baraska qabay, midna bidaarle ahaa, sheekadaas oo ku gaba gabawday labana inay imtixaankii ku guulaysteen oo ay mahadnaq la yimaadeen xoolihii la siiyayna wax ka bixiyeen, midna uu imtixaankii ku dhacay, nimcadii Eebana uu inkiray.

Marka aynu doonayno in ilmaheeno ogaado inaysan jirin wax ka qaalisan islaanimo iyo Rabbi oo la rumeeyo wadaduu jideeyayna la raaco, waxaynu uga sheekayn karnaa Sheekadii dadkii godka dabka lagu guray inay islaameen awgeed, danbi iyo gef aysameeyeen aysan jirin, kaliya looga dhigay danbi inay Rabbikood rumeeyeen mooyee, sheekadaas oo Alle kaga sheekeeyay Suuratul-buruuj.

Fiiro gaar ah :

Sheekooyinkaan aan meeshaan ku soo koobay waxaad ka heli kartaan iyagoo dhamays tiran kutubta axaadiista Rasuulka (NNKH) iyo faah faahsan , waana jeclaa in aan halkaan ku qoro iyagoo faahfaahsan ee kitaabkan ayaan ugu talagalay inuu noqdo mid kooban .

Hooyooyin iyo aabayaal aan isku dayno in aan raacno dariiqii uu Nabigu wax u tarbiyayn jirey aduun iyo aakhiroba khayr ayaan helaynaa .

MAHADSANID AKHRISTE,

Hadaad kaheshay aqoonta buugaan kuqoran halkaaan kagado isagoo dhamaystiran:

www.somalibusinessconsulting.com

Waxaad kuhelaysaa 7$ keliya.

Ama nambaradaan kusoodir :

0907061362 Sahal
0613682263 EVC
667061362 E-Dahab

Markay nasoogaarto lacagtaada waxaan email kuugusoodiraynaa buuga iyo furaha xarunta waxbarashada. Mahadsanid